Abuurista Iskuullo Ammaan ah oo la Oggolaan karo: Macluumaad ku saabsan Xeerka Oggolaanshaha Iskuullada (Qodobka 13)

Waan ogsoonnahay in ammaanka, mid ahaanshaha iyo iskuul la oggolaan karo waa wax aassaasi u ah hormarka iyo fayo-dhowrka ardayga.

Taasi ayay ahayd sababta ay dowladdu u soo saartey Qodobka 13, ee *Xeerka Iskuulo la Oggolaan karo*, sharcigaasoo hadda la dhaqan-geliyay.

Waa maxay Qodobka 13?

Qodobka 13 wuxuu guddiyada iskuulka uga baahan ahay in ay ka hortagaan oo ay wajahaan asluubta aannan haboonayn iyo ixtiraam-xumada dhextaala ardayda dhigata iskuuladeena. Dabeecaddahan waxaa ka mid ah xoog isu sheegasho, kala-sooc iyo dhib(af-lagaado). Sharciga cusub waa si cad u qeexayaa in Dabeecaddahan aannan iskuuladeena laga oggolayn. Sharcigu wuxuu gacan ka geysataa tixgelinta iyo is-af-fahamka dhamaan ardayda oo dhan iyada oo aan loo eeggeyn isir, jinsi, hanaan-jinsi, naafonimo ama xaalad kale oo kasta.

Sidee ayuu Qodobka 13 iskuulada iyo guddiga uga caawinaya inta ka hortaggan oo aynu wajahaan caaddooyinka aanan habooneyn, oo ay ku jirto boocboocsiga?

Qodobka wuxuu ku darsamayaa howsha ay horeyb u qabteen guddiga iskuulka iyo iskuulada. Qodobka 13 wuxuu guddiga uga baahan yahay in:

- Xeerar meel u yaaliin oo ay ku hormarinayaan anshaxa, ka hortagga boocboocsiga iyo dhexgalka, iyo waxbarasho loo dhan yahay oo loona wada siman yahay.
- Cawaaqib adag kula xisaabtan ardayda boocboocsanaysa ardayda kale. Ciqaabta waxay noqon kartaa xannibid iyo in la cayriyo xitaa haddii:
  - ardayga ardayga horeyba loogu xannibaad loogu soo roggey sababo boocboocsasho awgeed oo ardayga iskuul joogitaankiisa ay ardayda kale u keeneyso halis aannan la qaadan karin, ama
  - foorjeeyanta ay ku timid sabab eexasho, iska-nebcaan ama naceyb.

  Xeerka Tacliinta horey horeyba teegeero ugu baahnaa in la siiyo ardayda laga joojiyay iyo kuwa la ceyriyay:
  - Haddii ardayga la xannibey ama mudo dheer la ceyriyay (in ka badan shan maalmo iskuul), waxay la siin doonaa taageero waxbarasho/mid aan waxbarasho ahayn iyadoo loo marinayo barnaamijka xannibaadka/ceyrinta. Ardayda iskuulka laga ceyriyo ilaa iyo shan maalo iskuul waxaa la siin doonaa xirmo laylis guri ah.
- Macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee iskuulka la siiyo macluumaad iyo tababarro sanadle ah oo ku saabsan ka hortagga foorjeynta iyo in iskuulka la hergeliyo jawi iijaabo leh.
- Lagu daro himilooyin iskuulo jawi iijaab leh ka jirta iyo ka hortagga xoog isu sheegashada lagu daro qorshaha sanadlahooda dhowrka ah oo qorshahan dadkana ay heli karaan.

Qodobka 13 ma wax buu ka badellayaa doorka maamulayaasha?

- Qodobkan wuxuu maamulayaasha siinaayaa, mas'uuliyad cusub oo gaar ah. Iyaga hadda waxaa looga baahan yahay in:
  - Baaritaan ku sameeyaan dhacdo kasta oo uu soo gudbiyo shaqaalaha guddiga kaasoo horseedi kara in ardayga la xannibo ama la ceyriyo, oo ay ku jirto xoog isku sheegashada.
  - Ku wargeli waalidiinta/mas'uuliyiinta dhaley ardayda ay ardayga kale ku waxyeeloobey dhacdada, goorta aqlaaqda ardayga ay horseedi karto in la xannibo ama isluulka laga ceyriyo. Sidoo kale waalidiinta u yeer si aad uga wada-hadashaan taageerada canugooda uu heli doono.
  - U yeer waalidiinta/mas'uuliyiinta dhaley ardayga ay waxyeeladu ay waxyeeladu ka soo gaartey dhacdada si looga wada-hadlo taageerada canugooda uu heli doono. Maamuulayaasha horeyba waa looga baahnaa in ay waalidiinta ku wargeliyaan.
  - Macalimiinta laga wada-hadlo oo goorta ay ku haboon tahay, shaqaalah guddiga ee kale, ee soo sheegey dhacdada horseedi karta in ardayga la xannibo ama laga ceyriyo. Maamulayaasha waxaa looga baahnaan doonaa inuu iyaga ku wargeliyo natiijooyinkii ka soo baxay baaritaankoodii ku aaddanayd dhcadada.

Sidee buu Qodobka 13 u taageerayaa guddiga iyo iskuullada kala shaqeynta waalidiinta, ardayda iyo shaqaalaha kale iyo kuwa daneeya?

Qodobkan wuxuu waalidiinta ka caawinayaa in ay oggaadaan wax badan oo ku saabsan teegeerada ay caruurtoodu u heli karaan iyagoo u maraya iskuulka iyo dadaalka iskuulka uu la yimaado inuu iskuulka ka dhigo meel jawi iijaabo leh.

Guddiga wuxuu ka doonayaa in:

- Waalidiinta loo hirgeliyo hannaan ay raacayaan haddii ay qabaan wax welwel ah oo ku saabsan taageerada canugooda uu helo.

ISBN 978-1-4606-1145-6 (PDF) (Somali) © Madbacada Boqorada ee Ontario, 2013

Ontario

- La dejiyo qaab ardayda, waalidiinta iyo kuwa kaleba u oggolaada in ay soo sheegaan dhacdooyinka xoog isu sheegashada.
- Ay rayi ururin ku aaddan jawiga iskuulka ka qaadaan shaqaalaha, ardayda iyo waalidiinta ugu yaraan labadiiba sano mar.
- Waaldiinta la siiyo fursado badan oo ay uga oggaanayaan ammaanka ardayda iyo jawiga iskuulka.

Sidee ayuu Qodobka 13 ardayda u taageerayaa?

Qodobka 13 wuxuu uga baahan yahay:

- Iskuulada in ay ardayda aqlaaq xumida la timid ama kuwa ay saameyey aqlaaq xumida ay u fidiyaan teegeero.
- Iskuulada ay bixiyaan barnaamijyo, ka hortag ah ama barnaamijyo kale oo taageera dhibanayaasha ama kuwa aqlaaq xumida loo geystey, iyo kuwa dhacdada la kulmey.
- Iskuulada ay ardayga u oggolaataa qaabab ay usoo sheegayaan dhacdooyinka foorjeeyaanta.
- Guddiga iyo iskuulaadka in ay ardayda u oggolaadaan in kooxaha iskuuladooda ka jira sameeyaan wacyigelin iyo is-af-faham ku aaddan dhamaan ardayda mowduucyadan la xiriira sida:
  - midab-takoor naceyb;
  - dadka naafada ah;
  - sinnaanta jinsiga;
  - hanaan-jinsi iyo aqoonsi jinsi.

    Kooxahan waxaa laga yaabaa in ay ka mid yihiin Isbaheysiga Khaniista-Ragga (*Gay-Straight Alliances (GSAs)*).

Guddiga iyo maamulyaasha ma awoodaan in ay ka hortagaan in ay ardaydu isticmaasho magaca GSA ama magic kale ee ay ardaydu kooxaan u doortaan.

Ardayda waxay sameysan karaan noocyo kooxo kale oo sal looga dhiggayo baahida iskuulkooda.

- Magaca kooxda ay ardayga wado waa inuu ahaa mid horseedaya jawi iskuulka iijaabo u leh kaasoo middeeya oo ardayda oo dhanna oggolaada.

Sidee ayuu Qodobka 13 u saameynayaa ururada meel ka kireysta iskuullada dad-weynaha?

Qodobka 13 wuxuu uga baahan yahay kooxda seddaxaad, sida kooxaha ciyaartooyda iyo kooxaha jaaliyadda, in ay raacaan caadooyinka degsan oo la siman Xeerka Aqlaaqda Gobolka goorta ay Iskuullada dad-weynaha bar a isticmaalayaan. Xeerka wuxuu inaga caawinayaa in la hubiyo in dhamaan xubnaha jaaliyadda iskuulka loola dhaqmo si texgelin iyo sharaf ku jirto oo tani sanado badan ayuu xeerkaasi soo jirey.

Sidee ayuu “wajahid iskuul oo loo wada dhan yahay” iskuullada uga dhiggaa goob wanaagsan oo wax lagu barto?

Dhisida jawi iskuul oo loo siman yahay oo iijaabo leh wuxuu ubaahan yahay “wajahid iskuul oo loo wada dhan yahay” kaasoo ku saleysan xiriir badqab iyo texgelin oo ka wada jira iskuulka iyo jaaliyadda.

Iskuullo ammaan ah, loo midaysan yahay oo ardayda ku taageera in ay ka soo baxaan kartidooda ugu wanaagsan in ay fasalka ku jiraan iyo inta ka baxsan. Qofkastaaba wuxuu leeyahay door uu ka ciyaarayo inuu helo iskuullo ammaan ah, loo wada siman yahay oo la is oggolaado, oo uu ku jiro dowladda, guddiyada iskuulka, shaqaalaha iskuullka, waalidiinta, ardayda iyo xubnaha jaaliyadda.

Wadajir ayaan waxaan iskuulka uga abuuri karnaa jawi iijaabo leh oo ardayda oo dhan ka caawiya inay waxbartaan, koraan oo ayna liibaanaan.

Qodobka 13 wuxuu qeyb ka yahay qorshe tallaabo dhammaystiran ama iswata

Sharciga wuxuu ka shaqeeaa Mid ahanashaha iyo Sinnaanta Tacliinta iyo Xeeladdaha Badbaadada Dugsiyada. Sharciga wuxuu qeyb ka yahay qorshaha tallaabada ee balaaran kaasoo ka mid yahay:

- In iskuullada laga hirgeliyo shaqaalaha caafimaadka maskaxda oo la balaariyo adeegyada la tashiga ee fiidiyowga iyadoo la isticmaalayo takhtarka cilmi-nafsiga oo loo fidinayo caruurta deggan jaaliyaddaha magaalada dibadda ka ah ama meelaha fog-fog deggan.
- In la helo qaabab loogu darayo maamuliyaal waxbarasho oo sinnaan iyo mid ahaansho leh iyo xeelado ka hortagga xoog isu sheegashada iyadoo loo marinayo manhajka, talosiin loo soo mariyo Guddiga Manhajka Ontario.
- La qaado olole wacyigelin dad-weyne oo lagu soo qaadanayo in dhamaan reer Ontario oo dhan ay door ku leeyihiin ka hortagga foorjada.
- Abuurista Guddi Khabiiro Iskuullada la Oggoal yahay in ay talo ka siiyaan illaha iyo ku dhaqanka ahmiyad-saara wajahid iskuul oo loo wada dhan yahay, oo ay ku jirto ka hortagga foorjada iyo dhexgalka.

Ma qabtaa su’aallo dheeraad ah?

Waalidiinta qadka internetka ayay ka baran karaa waxyaabaha ku saabsan Ontario:

- Qorshaheeda Tallaabada Iskuullada la Oggol yahay kala soco www.ontario.ca/acceptingschools
- Xeeladdaha Badbaadada Dugsiyada kala soco www.edu.gov.on.ca/eng/parents/safekit.html
- Xeeladdaha Mid ahanashaha iyo Sinnaanta Tacliinta kala soco www.edu.gov.on.ca/eng/policyfunding/equity.html
- Xeerka Aqlaaqda ee Gobolka kala soco www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/standards.html